Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# JAN-FEB

# 2026

**SHARCI LR.45** **TAARIIKH: 10-KA JANAAYO 2026**

**SHARCIGA WAX-KA-BADDELKA HAY'ADDA XISAABIYEYAASHA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0810/B11/26**, ku taariikheysan **07/01/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta ku Waafaqidda Wax-Ka-Baddelka Hindise-Sharciyeedka Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Wax-Ka-Baddelka Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
04 FEB 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-009-2026
TAARIIKH 05-02-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Fe JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA
# HAY'ADDA XISAABIYEYAASHA SOOMAALIYEED

Wasaaradda Maaliyadda XFS

## CUTUBKA 1AAD
## MAGACA, UJEEDDO, ERAY BIXIN, BAAXADDA IYO AWOODDA SHARCIGA

### Qodobka 1aad
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa “Sharciga Hay’adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed”

### Qodobka 2aad
### Ujeeddada Sharciga

Ujeeddooyinka loo aasaasay Hay’adda waxaa kamid ah:

1. In ay nidaamiso qaab-hawleedka mihnadda xirfadleyaasha Xisaabiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
2. In ay dhoowrto danaha caamka ah ayadoo la xaqiijinayo raacista hab-dhaqanka sarreeya ee waafaqsan sharcigan, xeerarka lagu dhaqan-gelinayo iyo anshaxa wanaagsan ee dhammaan xirfadleyaasha xisaabaadka.
3. In ay dajiso, hagaajiso halbeegyada xisaabaadka Soomaaliya.
4. In ay kormeerto, lana socoto anshaxa xisaabiyeyaasha iyo shirkadaha xisaabaadka dalka, si loo gaarsiiyo hal-beegyada waafaqsan xirfadleyaasha xisaabaadka caalamiga ah.
5. In ay bixiso shatiyada shaqada xirfadleyaasha iyo shirkadaha xisaabaadka dalka.
6. In ay u raadiso aqoonsi/aqbalaad xirfadleyaasha xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
7. In ay hubiso in xisaabiyeyaasha iyo shirkadaha xaasaabaadku ay raaceen sharcigan, xeerarka lagu dhaqan-gelinayo sharciga Hanti-dhawrka Guud ee JFS iyo Sharciyada kale ee khuseeya.
8. In ay horumariso xirfadda xisaabaadka, ayada oo la sameynayo cilmi baaris natiijadeeda la baahinayo.
9. In wixii talo ku saabsan arrimaha la xariira xisaabaadka iyo xisaabiyeyaasha ay siiso hay’adda sharci dejinta iyo hay’adaha kale ee dalka.
10. In ay ka qayb-qaadato dejinta halbeegyada iyo qaab-dhismeedka xisaabaadka dalka.
11. In ay kala-taliso Dawladda arrimaha la xiriira xirfadda xisaabaadka.
12. In ay dejiso imtixaanka xirfadleyaasha xisaabaadka (CPAs) ee Dalka.
13. In ay tallaabo anshax marin marsiiso xubin kasta oo kamid ah xirfadleyaasha xisaabaadka oo lagu helo fal anshax xumo oo lid ku ah sharcigan iyo habraacyadiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 3$^{aad}$
## Eray Bixin

Erayada halkan ku xusan haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa, waxaa loo micnaynayaa sida soo socota:

1. **"Xisaabiye"** waa qof khirbrad u leh takhasuska xisaabaadka oo soo qaatay tababar iyo waxbarasho rasmi ah ee xirfadda xisaabaadka oo la aqoonsanyahay, kuna soo shaqeeyay, awood iyo xirfadna u leh in uu qabto shaqo xisaabaad iyo hanti-dhawris tayo sare leh una dhiganta heerka (Standard) caalamiga ah.
2. **"Xirfadleyda Xisaabaadku"** waa qof ka gudbay imtaxaannadii looga baahnaa isla markaana helay khibrad shaqo sida ku cad sharcigan.
3. **"SICPA"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed (Somali Institute of Certified Public Accountants).
4. **"Hanti-dhawr"** waxaa loola jeedaa baaris iyo xaqiijin lagu sameeyo diiwaanka maaliyadda iyo xisaabaadka hay'adeed iyo dukumiintiyada xaqiijinaya diiwaankaas oo uu hubiyo xirfadle madaxbannaan isaga oo waafajinaya shuruudo horey loo dajiyay.
5. **"Hanti-dhawre"** waa qof ama shirkad uu sharcigaani u oggolaanayo in uu qabto shaqooyin hanti-dhawr.
6. **"Sharci"** waxaa loola jeedaa Sharciga Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
7. **"Xeer-hoosaad"** waa xeer sharaxaad ka bixinaya laguna dhaqan-gelinayo sharcigan.
8. **"Golaha Maamulka Sare"** waa Golaha u xilsaaran maamulka hoggaaminta Hay'adda sida ku qeexan Qodobka 17$^{aad}$ ee sharcigan.
9. **"CPA (S)"** waa Xisaabiyeyaasha Guud ee la aqoonsanyahay (Certified Public Accountants of Somalia).
10. **"CAT (S)"** waa Xirfadlaha Xisaabaadka la aqoonsanyahay ee Soomaaliya (Certified Accounting Technician of Somalia).
11. **"IASB"** Guddiga Caalamiga ah ee Hal-beegyada Xisaabaadka (International Accounting Standards Board).
12. **"IFRS"** Warbixinta Caalamiga ah ee Hal-beegyada Maaliyadeed (International Financial Reporting Standards).
13. **"ISA"** Halbeegyada Caalamiga ah ee Hanti-dhawrka (International Standards on Auditing).
14. **"IFAC"** Xiriirka Caalamiga ah ee Xisaabiyeyaasha (International Federation of Accountants).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

15. **“Xubin”** waxaa loola jeedaa qof xubin ahaan looga diiwaangaliyay Hay’adda si waafaqsan sharcigan.
16. **“Xisaabiye Sharciyeysan”** waa xisaabiye haysta ruqsad shaqo si waafaqsan sharcigan.
17. **“FCPA (S)”** waa Xisaabiye Sare ee Soomaaliya (Fellow Certified Public Accountant of Somalia).
18. **“Hay’adda Xirfadleyaasha Xisaabaadka”** waa Hay’adda ay ku mideysan yihiin Xirfadleyaasha Xisaabaadka ee Dalka.
19. **“Dib-u-eegista Hubinta Tayada”** dib-u-eegis lagu xaqiijinayo in shirkad hanti-dhawr (b) ay leedahay hanaan buuxa ee tayo-hubin oo ku aadan habka baarista xisaabaadka iyo shaqooyinkeeda kale, (t) in ay u hoggaansanaato nidaamka hubinta tayada, iyo (j) in ay raacdo xeerarka xisaabaadka iyo shuruudaha sharciga ah ee la xiriira fulinta baarista xisaabaadka iyo hawlaha kale ee shirkaddu fuliso.
20. **“Xeerarka Dib-u-eegista Hubinta Tayada”** habraacyo gudaha ah oo loo qaabeeyey in ay shirkadda hanti-dhawr siiyaan xaqiijin macquul ah (b) in shirkadda iyo shaqaalaheedu ay ugu hoggaansamaan xeerarka xisaabaadka iyo sharciyada; (t) in warbixinnada shirkaddu soo saarto ay noqdaan kuwa ku haboon xaaladaha qofka la-baarayo; (j) in habraacyada muhiimka u ah fulinta iyo kor-joogteynta u hoggaansanaanta siyaasadaha shirkadda ay jiraan.
21. **“Diiwaan”** waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro Xubnaha Hay’adda oo loo diyaariyey hab waafaqsan sharcigan.
22. **“ACCA”** waxaa loola jeedaa shahaadooyin ay bixiyaan Ururka xirfadlayaasha xisaabaadka ee Caalamiga ah (Association Chartered Certified Accountant).
23. **“CIPFA”** waxaa loola jeedaa Shahaadada Machadka Maaliyadda guud ee Xisaabaadka (Chartered Institute of Public Finance and Accountancy).
24. **“ISQC”** waxaa loola jeedaa heerarka Caalmiga ah ee hubinta tayada ( International Standard on Quality Control).

## Qodobka 4aad
## Ku Dhaqanka Sharciga

Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan hawlaha xirfadleyaasha xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## CUTUBKA 2AAD
## AASAASIDDA HAY'ADDA

### Qodobka 5aad
### Dhismaha Hay'adda

1. Si loo gaaro ujeeddooyinka ku xusan Qodobka 2aad ee Sharcigan, waxaa sharcigan lagu dhisay "Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed" (Somali Institute of Certified Public Accountants), taasoo masuul ka noqonaysa maamulka iyo nidaaminta mihnadda xirfadda xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.

2. Waxay fulin kartaa dhammaan falalka lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka ku xusan sharcigan.

### Qodobka 6aad
### Xarunta Hay'adda

Xarunta dhexe ee Hay'addu waa Caasimadda Dalka ee Muqdishu, waxayna laamo ku yeelanayaan dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

### Qodobka 7aad
### Madax-bannaanida Hay'adda

1. Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed waa hay'ad madax-bannaan marka ay gudaneyso waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan sharcigan, waxayna leedahay shaqsiyad qaanuuneed.

2. Hay'addu waa in ay la wadaagtaa Wasaaradda Maaliyadda warbixinta sanadlaha ah ee Hay'adda oo tilmaamaysa waxqabadka iyo hadafyada hiigsiga Hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## CUTUBKA 3AAD
## QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA

### Qodobka 8aad
### Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka Hay'adda wuxuu noqonayaa sida soo socota:

1. Golaha Guud (GENERAL ASSEMBLY).
2. Golaha Maamulka Sare (GOVERNING COUNCIL).
3. Maamulka Hay'adda.

### Qodobka 9aad
### Shuruudaha Xubinnimada Golaha Guud

Shuruudaha Xubinnimada Golaha Guud waa in uu:

1. haysto Shahaado xisaabeed oo la aqoonsan yahay una dhiganta shahaadooyinka xisaabaadka caalamiga ah sida *Certified Public Accountant* ama *Chartered Accountant.*
2. uu leeyahay khibrad shaqo ugu yaraan Saddex (3) sano.
3. uu leeyahay sumcad iyo asluub wanaagsan.
4. maxkamadi ku ridin xukun shanti (5) sanno ee ugu dambeysay si kama dambays ah.

### Qodobka 10aad
### Golaha Guud

Xubnaha Golaha Guud waa golaha ugu sarreeya Hay'adda, waxa uuna ka kooban yahay dhammaan Xubnaha buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 9aad ee sharcigan.

### Qodobka 11aad
### Guddiyadda iyo Habraaca Doorashada

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa guddiyadda soo socda oo ay soo magacaabeen Golaha Maamulka Sare, waxaana ansixinaya Golaha Guud;
   a) Guddiga Doorashada,
   b) Gudiga Imtixaanka CPAs,

c) Gudiga Hubinta Tayada,
d) Gudiga Farsamada, iyo
e) Gudiga Adeega Xisaabiyeyaasha.

2. Habraaca Doorashada Golaha Maamulka Sare waa sida soo socota:
   a) Musharaxa u tartamaya Golaha Maamulka Sare waa in uu xubin ka yahay Golaha Guud.
   b) Codeynta doorashada waa mid qarsoodi ah.
   c) Xubin kasta oo Golaha Guud waxay leedahay hal cod.
   d) Musharaxa hela (50%+1) ayaa ku guulaysan doona doorashada haddii ay musharixiintu labo yihiin, haddii ay ka badan yihiin waxaa loo gudbayaa wareega labaad waxaana la tar-tansiinayaa musharixiinta ugu codka sarreeyo.
   e) Wareegga labaad musharixii hela codadka uga badan ayaa ku guuleysanaya Xubinnimada Golaha Maamulka Sare.
   f) Muddo xileedka xubinta la doortay waa laba (2) sano, waxaana dib loo dooran karaa laba (2) sano kale oo kaliya.

## Qodobka 12aad
## Waajibaadka Golaha Guud

Waajibaadka Golaha Guud waxaa kamid ah:

1. In uu doorto ama xilka ka qaado Golaha Maamulka Sare.
2. In uu ansixiyo Wax-ka-bedelka Xeer-hoosaadka Hay'adda.
3. Inuu magacaabo, shaqada u cusbooneysiiyo ama ka qaado hanti-dhawraha madaxa bannaan ee hay'adda.
4. In uu la xisaabtamo Golaha Maamulka Sare, markii la gaaro shirka sanadlaha ah ee Hay'adda.

## Qodobka 13aad
## Kulamada Golaha Guud

1. Golaha Guud ee xubnaha Hay'adda waxa uu kulmi doonaa sanad kasta hal mar, kaas oo lagu faah-faahin doono Xeer-hoosaadka Hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2. Golaha Guud waxa uu qabsan karaa shir aan caadi ahayn, marka ay soo jeediyaan saddex meelood hal meel ee Golaha Guud.

## Qodobka 14aad
## Shir Guddoonka Golaha Guud

1. Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Guud waxaa shir guddoominya qofka ugu da'da weyn.

2. Wixii fadhiga 1aad ka dambeeya, Kulamada Golaha Guud waxaa shir guddoominaya, Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare, haddii uu maqan yahay waxaa shir guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka.

## Qodobka 15aad
## Go'aan Ka Gaarista Arrimaha Lidka Ku Ah Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisa

Marka ay jirto eedeyn ama baaris la xiriirta Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare, waxaa shir guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka, haddii eedeyntu ama baaristu ay la xiriirto Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisaba, waxaa shir guddoominaya qofka ugu da'da weyn Golaha Guud, si lamid ah Qodobka 14aad ee sharcigan.

## Qodobka 16aad
## Guntanka (Quorum) Golaha Guud

1. Aqlabiyadda tirada guud ee Xubnaha Golaha Guud (50%+ 1) ayaa noqonaysa guntanka (Quorum). Go'aannada ka soo baxa shirarka waa dhaqangal haddiii guntan uu jiray xilligii codka la qaadayay.

2. Haddii guntanka (Quorum) uu buuxsami waayo waxaa dib loo dhigayaa kulanka.

## Qodobka 17aad
## Golaha Maamulka Sare (Governing Council)

1. Golaha Maamulka Sare waxa ay ka kooban yihiin kow iyo toban (11) xubnood, waana sida soo socota:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

a) Toddobo (7) xubnood oo ka imaanaya Golaha Guud oo ay ku jiraan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Maamulka Sare waxaa laga dhex dooranayaa xubnaha la doortay ee golahan todobada (7) ah, si waafaqsan sharcigan.
b) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
c) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Hanti-dhawraha Guud.
d) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo
e) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.

2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Maamulka Sare waxaa laga dhex dooran karaa oo kaliya xubnaha todobada (7) ah ee ka imaanaya Golaha Guud.

## Qodobka 18$^{aad}$
## Shuruudaha Xubinnimada Golaha Maamulka Sare

Shuruudaha Xubnaha ka imaanaya Xafiisyada Dowladda ee ku xusan Qodobka 17$^{aad}$, farqadaha (b,c, d iyo e) waa:
1. In uu yahay muwaadin Soomaali ah.
2. In uu leeyahay sumcad fiican.
3. In uu ugu yaraan jaamacad la aqoonsan yahay ka haysto shahaadada koowaad ee Dhaqaalaha, Xisaabaadka ama waxyabaha (takhasusyada) la xiriira.
4. In uu yahay qof ka haya/jooga hay'addiisa jago sare go'aanna gaari kara.
5. In uu yahay qof diyaar u ah ku shaqaynta mihnadda xisaabaadka.
6. In uu yahay qof ay ka go'antahay xaqiijinta daah furnaanta iyo isla xisaabtanka.

## Qodobka 19$^{aad}$
## Waayidda Xubinnimada

Xubinnimada Golaha Maamulka Sare waxa lagu waayi karaa sababaha soo socda midkood:
1. In ay ku timaado geeri.
2. In uu xilka iska casilo.
3. In Maxkamadi ku hesho dembi.

4. Caafimaad darro keeni karto in uu gudan waayo xilka, taas oo Dhakhtar khibrad u leh caddeeyey.
5. Sababo xil gudasho la'aan marka ay soo jeediyaan (2/3) xubnaha hay'adda.

## Qodobka 20aad
## Waajibaadka Golaha Maamulka Sare

Golahu wuxuu dejinayaa xeer-nidaamyeyaal (regulation), qorshayaasha iyo istiraatiijiyadda soo socda.

1. In ay diyaariyaan halbeegyo (standards) iyo hab-raacyo lagu horumarinayo mihnadda xirfadleyaasha xisaabiyeyaasha soomaaliyeed.
2. In ay qeyb ka noqoto habraaca sharci siinta shirkadaha xisaabaadka ee ka howl-gala JFS.
3. Asaasidda iyo joogteynta nidaam lagu diiwaan-gelinayo dhammaan xirfadleyda xisaabiyeyaasha soomaaliyeed.
4. In ay bixiyaan shahaadooyinka, ruqsadaha, diiwaan-gelinta iyo oggolaashaha ay ku shaqeynayaan shirkadaha iyo shaqsiyaadka ku shaqeeya xisaabaadka.
5. Tababaridda iyo horumarinta mihnadda xirfedlayaasha xisaabiyeyaasha soomaaliyeed.
6. Hirgelinta xarun cilmi baaris.
7. Talo siinta Xukuumadda Soomaaliya arrimaha ku saabsan xisaabaadka.

## Qodobka 21aad
## Shuruudaha Laga Doonayo Guddoomiyaha Maamulka Sare

Qof walba oo u taagan qabashada Xilka Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxaa laga doonayaa shuruudaha soo socda:

1. In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed.
2. Waa in uu yahay Xubin Buuxda oo ka tirsan Hay'adda.
3. Waa inuu yahay xubin lasoo doortay kana tirsan Golaha Maamulka Sare ee hay'adda.
4. Waa in uu yahay Caadil, aamin, ilaallin kara Midnimada iyo Midowga hay'adda.
5. Waa in uu sumcad ku dhex leeyahay Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
6. Waa in uu yahay qof awood u leh shaqada guddoominta.

## Qodobka 22aad
## Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare

Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waa:

1. In uu shir guddoomiyo Kulamada Golaha Maamulka Sare ee hay'adda.
2. Qof diyaar u ah in ay la xisaabtamaan Golaha Maamulka Sare iyo Golaha Guud ee Hay'adda.
3. In uu ku hoggaamiyo, isla markaana ugu adeeggo danaha Hay'adda.
4. In uu abuuro horumar iyo astaan masuuliyadeed ee ku aaddan macaamilka xubnihiisa, dadweynaha iyo bulshada uu u adeego.
5. In uu ku hoggaamiyo isla markaana ku hagi karo siyaasadaha ujeedooyinka fog ee Hay'adda.
6. In Hay'adda ku matalaa xiriirka daneeyayaasha gudaha iyo dibadaba.
7. In uu matalo Hay'adda, isaga oo kaashanaya Mareeyaha Guud.

## Qodobka 23aad
## Waajibaadka Guddoomiye Ku-xigeenka

1. Guddoomiye ku-xigeenka wuxuu la shaqeynaa Guddoomiyaha Maamulka Sare, waxa uuna fulinaya wixii hawl uu u xilsaaro Guddoomiyaha.

2. In uu shir guddoomiyo Golaha Maamulka Sare marka uu maqan yahay Guddoomiyaha.

## Qodobka 24aad
## Kulamada Golaha Maamulka

1. Xubnaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxa uu kulmi karaa Saddexdii (3) Bilood mar, kaas oo lagu faah-faahin doono Xeer-hoosaadka Hay'adda.

2. Xubnaha Golaha Maamulka Sare waxa ay qabsan karaan shir aan caadi aheyn marka ay codsadaan afar meelood hal meel ee Xubnaha Golaha Maamulka Sare.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 25aad
## Muddo Xileedka Golaha Maamulka Sare

Muddada xil-haynta Golaha Maamulka Sare waa Labo (2) Sano ah oo la cusboonaysiin karo halmar kaliya.

# CUTUBKA 4AAD
# GUDDIGA MAAMULKA FULINTA

## Qodobka 26aad
## Maamulka Hay'adda

Waajibaadka Shaqo ee Maamulka Fulinta waa:

1. Maamulida hantida iyo hawlaha hay'adda, isagoo warbixinta si bille iyo sanadle ula wadaagaya Golaha Maamulka Sare.
2. Maamulka iyo maareynta xafiiska keydinta xog sax ah oo dhammeystiran ee xubnaha ururka ardayda iyadoo loo adeegsanayo aaladaha casriga ah ah ee teknoolojiyada.
3. Abaabulka Shirarka Golaha Maamulka, guddi-hoosaadyada, soo saarista ajendayaasha iyo natiijooyinka shirarkaas.
4. Abaabulka xubnaha golaha, guddi-hoosaadyada iyo maamulista adeegyada xubnaha iyo xiriirada ururku la yeelanayo dalka iyo dibadda.
5. Maamulista arrimaha ardayda, imtixaannada iyo diiwaannada tababarrada.
6. Maamulista iyo hagidda horumarinta joogtada ah iyo takhasus u diyaarinta xubnaha adeegyo farsamo.
7. Abuurista Maktabad.
8. Ka shaqaynta hawlaha sharciga la xiriira, arrimaha farsamo iyo mashaariicda.
9. Fulinta arrimaha xiriirka dadweynaha, warbaahinta iyo sidoo kale horumarinta (tusaale tababarada iyo shirarka).
10. Sameynta iyo maamulista xiriirka Hay'addu la leeyahay hay'adaha xirfadleyda ah ee kale, Dowladda, wakiillada horumarinta iyo danneeyayaasha.
11. Turjumaadda xeerarka caalamiga ee xisaabaadka, hanti-dhawrista iyo xeerarka anshaxa.
12. Baaritaanka/dabagalista iyo anshax-marinta xubnaha Hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 27[aad]
## Magacaabista Maareeyaha Guud iyo Xoghayaha

1. Golaha Maamulka Sare ayaa magacaabaya Maareeyaha Guud iyo Xoghaynta si ay u maareeyaan shaqooyinka Hay'adda.

2. Qofka noqonaya Maareeyaha Guud waa inuu yahay qof haysta Shahaadada CPA, ACCA, ama CIPFA, IWM.

3. Haddii uu xafiiska ka maqanyahay Maareeyaha Guud, Goluha Maamulka Sare waxay u idmi karaan in Xoghayuhu (Maareeye Ku-xigeen) ama cid kale oo karti u leh shaqada oo xafiiska maamulka ka tirsan in ay shaqada sii wadi karto.

## Qodobka 28[aad]
## Waajibaadka Maareeyaha Guud ee Hay'adda

Maareeyaha Guud waajibaadkiisa shaqo waxay noqonayaan:

1. Diyaarinta iyo soo saaridda Hiigsiga fog ee Hay'adda iyo qorshe-hawleedyo taariikhaysan.
2. Hagidda iyo horumarinta shaqaalaha iyo la shaqaynta guddiyada kale ee khuseeya.
3. La talinta Guddoomiyaha, Golaha Maamulka Sare iyo isxil-qaamayaasha Hay'adda.
4. Sameynta xiriir wadashaqeyn wanaagsan oo u dhexeeya Hay'adda iyo Dowladda, ganacsatada, iyo xirfadleyda kale, Hay'adaha waxbarashada iyo wakiillada deeq-bixiyayaasha.
5. Xaqiijinta in shati bixinta iyo hannaanka anshax-marintu ay yihiin kuwa xaq-soor ah oo ku salaysan nidaamka Hay'addu u dhigtay.
6. Xaqiijinta in Xubnaha Golaha Maamulka iyo dadka kale ee muhiimka ah ay ka war-hayaan waxyaabaha saameynaya mihnadda xisaabaadka, ee ka dhacaysa dalka iyo dibadaba, dhacdooyin kaas oo ay ka mid tahay shaqada (IFAC).
7. U maamulista shaqaalaha iyo hantida Hay'adda si waafaqsan miisaanniyada iyo siyaasadaha ay ansixiyeen Golaha Hay'adda.
8. Uga warbixinta Guddoomiyaha iyo Guddiga tilaaboyinka loo qaaday dhanka horumarinta hiigsiga Hay'adda iyo magacaabida farsamo yaqaannada iyo shaqaale caawiya hawlaha kala duwan ee hay'adaha xirfadleyda iyo go'aaminta shuruudaha shaqada iyo shaqaalaha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 29aad
## Waajibaadka Xoghayaha

Waajibaadka Xoghayaha waxaa ka mid ah:

1. Abaabulka iyo soo xaadiridda Shirarka Golaha Maamulka iyo Guddiyada.
2. Diyaarinta ajendaha iyo qorsheyaasha kulamada golaha iyo guddi-hoosaadyada kale.
3. Hagidda hawlaha la xiriira shirka sannadlaha ee Xubnaha Golaha Guud.
4. Keydinta qoraallada iyo dukumintiyada rasmiga ah ee Hay'adda.
5. Keydinta xogaha iyo diiwaanka xubnaha Hay'adda.

# CUTUBKA 5AAD
# XUBINNIMADA HAY'ADDA

## Qodobka 30aad
## Xubnaha Hay'adda

Xubinnimada Hay'addu waxaa kamid ah:

1. Xubinnimo Shaqsi ah, waa kuwa soo socda:
   a) Xubno haysta shahaadada sare ee xisaabaadka iyo khibradda shaqo muddo 5 sano ah, uga soo shaqeeyey Hay'adda SICPA iyo Hay'adaha kale ee Caalamiga ah.
   b) In uu yahay xubin sare oo joogta ah u buuxiyey shuruudaha iyo khibradda looga baahan yahay.
   c) In uu uga mid noqdo xubinnimo kaaliye-sare ee xisaabaadka iyo hanti-dhawrista.
   d) In uu uga mid noqdo xubinnimada khibradda xirfaddiisa xisaabaadka.
   e) In uu uga mid noqdo xubin sharafeed.

2. Xubinnimo shirkadeed, taas oo micneheedu yahay sida shirkadaha mihanadda /xirfadda xisaabaadka, ama hanti-dhawrka ee ka shaqeeya Soomaaliya.

3. Xubinnimada shirkadeed waa in ay ahaataa sida soo socota:
   a) In ay haystaa xubno haysta shahaado sare oo xisaabaadka ah iyo khibradda shaqo muddo 5 sano ah, uga soo shaqeeyey Hay'adda SICPA iyo Hay'adaha kale ee Caalamiga ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 31aad
## Muddada Ku Meel Gaar ah

Inta lagu guda jiro muddada ku meel gaar ka ah:

1. Oggolanshaha xubin ka noqoshada Hay'addan ee xubin sare, xubin buuxda, xubin aan helin khibraddii (Associate) iyo kuwa shahaadada hoose haysta (CAT) welina waxbarashada ku guda jira kana tirsan ururo qalaad wuxuu wakhtigoodu ku egyahay muddo soddon iyo lix (36) bilood ah oo ka bilaabanaysa taariikhda uu ansixiyo Baarlamaanku sharcigan, Madaxweynuhuna uu saxiixo. Laga bilaabo taariikhdaas ma jiri doonto xubin cusub oo laga aqbalayo in ay Hay'addan xubin uga noqoto shahaado qalaad sababtoo ah saddex sano kadib Hay'addan waxay yeellan doontaa nidaam aqoonsi shaqaynaya.

2. Saddex (3) sano oo ka bilaabanaysa taariikhda sharcigaan la ansixiyo, xubin kasta oo ku diiwangashan xubin khibrad lahayn ee Hay'adda waa in uu isku dayo in uu dhammaystiro shuruudaha khibradda ee Hay'adda xisaabaadka qalaad uga baahan tahay. Saddex (3) ka dib xubinnimada ardaynimadu waxay u joogsan doontaa si iskeed ah.

## Qodobka 32aad
## Aqoonsi laba dhinac ah

Maadaama loo baahan doono in la aqoonsado shahaadooyinka qalaad, Hay'addu waxa ay aqbali doontaa mabaadi'da is aqoonsiga ka dhexeeya hay'addan iyo kuwa dalal kale iyadoo loo hoggaansamayo maamuuska aqoonsi ee hay'addan. Waxaa fiiro gaar ah loo yeelanayaa sumcadda xirfadeed ee hay'adda shahaadooyinkiisa la aqoonsanayo leedahay iyo aqoonta qofku u leeyahay Xeerarka Canshuuraha iyo Sharciga Shirkadaha ee Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA 6^AAD
## XEERKA XISAABIYEYAASHA IYO KU DHAQANKIISA

### Qodobka 33^aad
### Ku Shaqeynta Xisaabaadka

1. Qofka waxaa loo aqoonsanayaa in uu ku shaqeeyo xisaabaadka marka uu is-kiis ugu shaqaysto ama cid kale faa'iido uga qaato arrimaha soo socda:
   a) Qabashada adeegyo baaris, xaqiijin iyo ansixinta dhaq-dhaqaaqyada maaliyadeed ama warbixinnada la xiriira; ama
   b) Bixinta adeegyo waafaqsan Sharciga Hay'addan, ahna mid ku shaqaysta xisaabaadka.

2. Dhammaan madaxda hawlaha xisaabaadka, maaliyadda iyo Hanti-dhawraha Gudaha ee Dowladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay ee danta guud la xiriira waxay xubno ka noqonayaan Hay'addan si waafaqsan Qodobka 9^aad ee sharcigan.

3. Sarkaal dowladeed ama qofka lagu sheegay Farqadda 2^aad oo ay cid kale shaqaalaysiisay si uu u qabto shaqo xisaabeed looma aqoonsan doono qof ku shaqaysta mihnadda xisaabaadka.

### Qodobka 34^aad
### Shuruudaha Shahaadooyinka Shaqada iyo Shatiyada

1. Qofna looma aqoonsanayo shaqo xisaabeed, haddii aysan ka haysan shahaado ama shati shaqo Hay'addan.

2. Qof kasta oo khilaafa arrimaha lagu sheegay Farqadda 1^aad ee Qodobkan, waxa uu galay fal aan sharci ahayn, waxaana la horgeyn doonaa hay'adaha awoodda u leh.

3. Shirkad kasta kama shaqayn karto shaqo xisaabeed, haddii aysan shati ama ogolaansho ka haysan Hay'addan.

4. Shirkad kasta oo ku kacda arrimo khilaafsan Farqadda 3^aad ee qodobkan waxaa loo aqoonsanayaa in ay gashay fal aan waafaqsaneyn sharcigan, waxaana la horgeyn doonaa hay'adaha awoodda u leh, sida uu sharcigu tilmaamay.

## Qodobka 35aad
## Codsiyada iyo Soo Saaridda Shahaadada

1. Codsiga shahaadada shaqada waxaa lagu hagaajinayaa Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda.

2. Codsiga shahaadada shaqada waxa ay noqonaysaa arji qoran oo ay la socoto kharashka diiwaan-galinta.

3. Qofkii la yimaada codsi si waafaqsan Faqradda 2aad ee Qodobkan, Goluhu waxa uu siinayaa shahaado shaqo, haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha soo socda:
   a) In uu Hay'adda uga diiwaan-gashan yahay xubin buuxda;
   b) In aysan maxkamadi ku xukumin dambi ciqaabeed nooc kasta uu yahay;
   c) In uu degganyahay Soomaaliya, canshuur bixiyena yahay;
   d) In uu bixiyo kharashka diiwaangalinta;

4. Shahaadada shaqadu waxay ka bilaabanaysaa taariikhda la soo saaray waxayna ku egtahay 31ka December ee isla sannadka la soo saaray balse waa la cusbooneysiin karaa markii qofka iska leh uu codsado.

5. Goluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu diido codsi shahaado shaqo haddii ayna ku qancin xubinta codsiga soo gudbisatay.

6. Haddii Goluhu diido bixinta shahaado shaqo ee xubinnimo buuxda si waafaqsan Farqadda 5aad ee Qodobkan, Guddigu waxa uu soddon (30) maalmood gudahood ku wargaliyaan xubinta go'aanka diidmada codsiga shahaadada iyo asbaabta loo cuskaday.

7. Haddii uu qofku u arko in uu xad-gudub ku yahay go'aanka, waxa uu cabasho u gudbisan karaa maxamkamadda awoodda u leh, muddo kow iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku qofka gaaray.

8. Golaha Maamulka Sare waxay hakin karaan ama la noqon karaan shahaadada lagu bixiyay si waafaqsan Faqradda 3aad ee qodobkan, haddii xubinta la siiyay ay ku kacdo fal xad-gudub ku ah Xeerka Anshaxa.

## Qodobka 36aad
## Cusbooneysiinta Shahaadda Shaqada

1. Xisaabiye kasta ee loo cusbooneysiinayo shahaado shaqo waxa uu codsi qoraal ah u soo gudbinayaa Golaha, ugu yaraan labo bilood ka hor xilliga dhicitaanka shahaadada.

2. Haddii codsiga cusbooneysiinta lagu sheegay faqrada hore lagu soo gudbin wakhtiga la tilmaamay, xoghayuhu waxa uu la socodsiinayaa Golaha, kadib Goluhuna waxa uu farayaa in diiwaanka shaqada laga saaro ama la hakiyo magaca xisaabiyahaas la cayimay.

3. Goluhu wuxuu diidi karaa cusboneysiinta shahaado shaqo, waana in ay diidmada ku war-geliyaan xubintii soo codsatay shahaadada muddo soddon (30) bari gudahood ah, ayaga oo u caddeynaya go'aanka diidmada codsiga shahaadada iyo sababta loogu cuskaday; iyo

4. Haddii uu qofku u arko in uu xad-gudub ku yahay go'aanka, waxa uu cabasho u gudbisan karaa maxamkamadda awoodda u leh, muddo kow iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku qofka gaaray.

## Qodobka 37aad
## Adeegsiga Magaca Hay'adda

1. Xisaabiyaha haysta shahaadada xisaabaadka waxa uu xaq u leeyahay adeegsiga magaca "Xisaabiye laga aqoonsanyahay Waddanka Soomaliya" CPA (S) ama cinwaanka kale oo uu bixiyo Goluhu.

2. Xisaabiye kasta oo H ay'addu u aqoonsan tahay xirfadle xisaabiye, waxa uu xaq u leeyahay in uu isticmaalo magaca Xisaabiye CPA (S) ee "Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed" ama magac kasta oo kale oo ay oggolaadaan Golaha Maamulka Hay'addu.

**Qodobka 38aad**
**Codsi iyo Soo Saaridda Shatiga Sanadlaha ah**

1. Haddii qof haysta aqoonsiga xirfadle xisaabiye la aqoonsan yahay uu samaysanayo shirkad xisaabaad iyo hanti-dhawr, ha ahaato mid uu keli u leeyahay ama lala leeyahay, waxa uu Golaha Maamulka ee Hay'adda ka codsanayaa shati sannadle ah, isaga oo maraya habraaca loo dejiyey, lana wadaagayo Golaha dhammaan xogta ay uga baahan yihiin.

2. Marka uu soo gaaro Golaha Maamulka codsi shati oo waafaqsan Farqadda 1aad ee Qodobkan, waxa uu siinaya codsaha shatiga uu soo codsaday, marka uu buuxiyo dhammaan shuruudaha hoos ku xusan:
   a) Waa in qofka ama qayb ka mid ah dadka leh shirkadda ay haysto/haystaan ogolaanshaha shaqada xisaabaadka ee Hay'adda.
   b) Waa in ay xafiis ku leeyihiin waddanka gudihiisa.
   c) Waa in haystaan ruqsad ganacsi oo aan dhacsanayn.
   d) Waa in ay shirkaddu bixisay dhammaan kharashaadka ku waajibay.
   e) Waa in aan magaca shirkaddu abuurayn jaah-wareer ama dhibaato u keenayn danaha dadka kale, sidoo kalena ahayn ama shabahayn magac ay leedahay shirkad horay loo aqoonsaday.
   f) Waa in ay shirkaddu buuxiso dhammaan wixii shuruudo iyo habraacyo kale ah ee ay dejiyaan Golaha Maamulku Hay'adda.

3. Haddii shirkaddu tahay Ajnebi, waa in ugu yaraan xirfadleyaasha xisaabeed ee shirkadda leh midkood uu noqdaa mawaadin Soomaaliyeed.

4. Golaha Maamulka Sare waxa uu awood u leeyahay in uu shatiga u diido shirkadda haddii uu ku qanci waayo codsigeeda.

5. Haddii Golaha Maamulka Sare ay diidaan aqbalidda codisga shatiga ee shirkadda, si waafaqsan Farqadda (c) ee Qodobkan, waa in Goluhu soddon (30) maalmood gudahood la wadaagayaa shirkadda go'aanka diidmada codsiga shatiga shirkadda iyo asbaabta loo cuskaday.

6. Haddii shirkaddu u aragto in go'aanka uu ku yahay xad-gudub, waxay cabasho uga qaadan kartaa go'aanka golaha maxakamadda awoodda u leh, muddo kow

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku shirkadda gaaray.

7. Shatiga lagu soo saaray hab waafqsan qodobkan wuxuu shaqaynayaa laga bilaabo maalinta la soo saaray illaa 31[ka] December ee sannadkaas.

8. Golaha Maamulku Sare waxa ay hakin karaan ama la noqon karaan shatiga shaqada ee kusoo baxay habka waafaqsan qodobkaan, haddii shirkaddu ku xad gudubtay Xeerka Anshaxa ee Xirfadda.

## Qodobka 39[aad]
## Cusbooneysiinta Shatiga Sanadlaha Shahaadada ah

1. Marka Shirkad loo cusbooneysiinayo shatiga shaqada, waxaa ay codsi qoraal ah u soo gudbinaysaa Golaha maamulka, ugu yaraan labo bilood ka hor taariikhda dhicitaanka shatiga la bixiyey.

2. Haddii shirkaddu aysan soo codsan cusbooneysiinta shatiga wakhtiga loo qabtay, xoghayuhu waxa uu la socodsiinayaa Golaha Maamulka Sare arrintaas, Goluhuna waxa ay amrayaa in shirkaddaas laga saaro liiska shirkadaha loo ogol yahay in ay ka shaqeeyaan shaqada xisaabaadka iyo hanti-dhawrka.

3. Golaha Maamulka Sare waxa uu diidi karaa shirkadda cusboonaysiinta shatiga, goluhu oo muddo dhan soddon maalmood (30) gudohood ku wargeliyaa shirkadda ay khuseyso, una caddeynayaa diidmadiisa ku aadan cusboonaysiinta shatiga shirkadda iyo sababaha diidmadiisa; iyo

4. Haddii shirkaddu u aragto in go'aanka uu ku yahay xad-gudub, waxay cabasho uga qaadan kartaa go'aanka Golaha maxakamadda awoodda u leh, muddo kow iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku shirkadda gaaray.

## Qodobka 40[aad]
## Oggolaashiyaha Shatiyada Shaqada ee Sanadlaha

Ogolaanshaha ama shati shaqo ee la siiyay qof ama shirkad waxa ay ahaanayaan hanti uu leeyahay Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 41$^{aad}$
## Baaritaanka Shirkadaha Xisaabaadka

1. Shirkad kasta oo soo codsanaysa shati shaqo oo cusub, waa in ay buuxisaa shuruudaha iyo habraac baariseedka uu dejiyay Golaha Maamulka Sare, si waafaqsan Qodobbada 34$^{aad}$ iyo 35$^{aad}$ ee sharcigan.

2. Codsiga cusboonaysiinta shati horay u jiray waxaa loo marayaa habraaca ku xusan Qodobka 39$^{aad}$ ee sharcigan.

# CUTUBKA 7$^{AAD}$
# HUBINTA TAYADA & XEERKA ANSHAXA EE XIRFADDA

## Qodobka 42$^{aad}$
## Nidaamka Dib-u-eegista Hubinta Tayada

1. Hay'addu waxa ay sameynaysaa nidaam dib-u-eegis iyo tayo hubin shaqooyinka sida hanti-dhawrista ama adeegyada kale ay qabtaan ee la xiriira shaqada xubnaha Hay'adda iyo shirkadaha xubnaha ka ah Hay'adda.

2. Ujeeddada dib-u-eegistani waa sidii loo hubin lahaa in xubnaha ama shirkadaha xubnaha ka ah Hay'adda in ay shaqooyinkooda u guteyn hab waafaqsan xeeraraka anshaxa iyo heerarka tayo ee Hay'adda, iyo Xeerarka anshaxa iyo kuwa xisaabaadka caalamiga ah ee ay soo kala saareen Golaha Caalamiga ee Xeerarka Anshaxa iyo Golaha Caalamiga ah ee soo Xeerarka Hanti-dhawrka iyo shaqooyinka la xiriira.

3. Golaha Maamulka ee Hay'addu waa in uu abuuraa hab-raacyo faahfaasan ee loo maro ee hubinta tayada shaqo oo waafaqsan Xeerarka Caalmiga ah ee hubinta tayada ee loo soo gaabiyo ISQCI iyo habraaca waajibaadka xubinnimo ee ay soo saartay Hay'adda Xisaabaadka Caalamiga ah ee (IFAC).

## Qodobka 43$^{aad}$
## Xeerka Anshaxa Xirfadda

1. Sharcigan wuxuu yeelan doonaa xeer-hoosaadyo iyo xeer-nidaarniyayaal lagu hago fulinta waajibaadka Hay'adda iyo habraacyada anshaxa xirfadeed, kuwaas oo

waafaqsan Xeerarka IFAC.

2. Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda waxa uu u hoggaansamayaa Xeer-hoosaadyada Anshaxa Xirfadda.

3. Xubintii ku xad-gudubta Xeerarka Anshaxa waxa loo gudbinayaa Guddiga Dabagalka iyo Anshax-marinta ee Hay'adda.

## CUTUBKA 8AAD
## TILLAABOOYINKA ANSHAX-MARINTA

### Qodobka 44aad
### Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta

1. Hay'addu waxa uu yeelanayaa Guddi Baaris iyo Anshax-marin, si waafaqsan Xeer-hoosaadka Hay'adda.

2. Golaha Maamulka Sare ayaa dejinaya habraaca Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta ee Hay'adda.

3. Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta waxa ay awood u leeyihiin in ay ganaaxaan Xubnaha Hay'adda kuwaas oo lagu helay fal anshax-xumo oo khilaafsan xeerkan.

### Qodobka 45aad
### Fulinta Tillaaboyinka Anshax-marinta

1. Golaha Maamulka Sare ayaa ka mas'uul ah fulinta go'aannada Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta ee Hay'adda.

2. Marka Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta uu hakiyo ogolaanshaha uu qof ama shirkad u haysto shaqooyinka xisaabaadka iyo hanti-dhawrka ama kala noqdaan xubinnimadiisa Hay'adda, Golaha Maamulka Sare waxa uu xubintaas magaceeda ka saarayaa ama ka hakinayaa liiska Xubnaha Hay'adda.

3. Xubin ama shirkad kasta oo Guddiga Baarista iyo Anshax-marintu uu ka joojiyo ogolaanshaha shaqo ama kala noqdo xubinnimada Hay'adda, waxa ay sidaas ku luminaysaa ogolaanshaha shaqo ama xubinnimadeeda waana in Golaha Maamulku

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

ka dalbadaan in ay xubintaasi ku soo celiso shahaadada ogolaansho ee Hay'adda muddo todoba (7) maalmood ah gudahood.

### Qodobka 46aad
### Cabashada

Xubintii u aragta in go'aanka uu gaaray Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta uu xad gudub ku yahay, waxa ay xaq u leedahay in ay cabasho u qaadato maxkamadda awoodda u leh muddo saddex bilood gudahood ah laga bilaabo maalintii uu go'aanka guddigu soo gaaray xubinta.

## CUTUBKA 9AAD
## BAAHIYAHA DHAQAALAHA

### Qodobka 47aad
### Dhaqaalaha Hay'adda

1. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa uu ka koobnaan karaa:
   a) Lacagta xubinnimada ka soo uruurta, lacagta codsiga iyo diiwaangalinta iyo lacagta kasoo uruurta rukumasho kale hadba sidii ay go'aamiyaan Golaha Hay'adda.
   b) Kabka laga helo Dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah deeqaha, hadiyadaha iyo kaalmooyinka kuwaas oo Golaha Maamulku go'aansado in la aqbalo.
   c) Faa'iidada maalgashiga lacagta Hay'adda iyo dakhliga laga helo daabacaadaha iyo gadista shaqooyinka cilmi baarista, waxbarashada iyo daabacadaha kale iyo dakhliga adeegyada hay'adda ku fuliyo.
   d) Lacagta Hay'adda u deynsanayso si ay u fuliso hawlaheeda.

2. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa maamuli doona Golaha Maamulka Sare si waafaqsan Siyaasadda Maaliyadda ee Hay'adda iyo Shuruucda Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya.

3. Hay'addu waxa ay koontooyin xisaabeed bangi ku yeelanaysaa bangiyada uu Golaha Hay'adda ansixiyey iyadoo la marayo hab uu goluhu ansixiyey.

4. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa loo isticmaali karaa oo kaliya hawlaha iyo ujeedooyinka Hay'adda.

5. Bixinta kharashaadka iyo isticmaalka lacagaha yaryar waa in ay waafaqsan yihiin Siyaasadda Bixinta Lacagaha iyo Habka Maamulka Maaliyadda ee uu Golaha Maamulku Sare ansixiyey.

## Qodobka 48aad
## Awoodda Amaahashada

Hay'adda waxaa au amaahan kartaa lacag, iyada oo uu ku dhaqmayo shuruudo Golaha Maamulku ku heshiiyay si lacagtaas loogu fuliyo shaqooyinka Hay'adda.

## Qodobka 49aad
## Maalgashiga

Hay'addu waxaa ay ku maalgashan karaa lacagtaas hababka maalgashi ee uu Golaha Maamulka Sare ansixiyey.

## Qodobka 50aad
## Sannad Xisaabeedka iyo Xisaab-xirka

1. Sannad-xisaabeedka ururku waxaa uu ka bilaabanayaa 1da Janaayo waxaana uu ku dhammaanayaa 31ka Diseembar sannad kasta.
2. Xisaab-xirka sanadlaha waxa uu noqonayaa bisha 12aad ee Diseember.

## Qodobka 51aad
## Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Hay'addu waxaa uu joogteynayaa diiwaan-xisaabeed oo munaasib ah iyadoo uu diyaarinayo warbixin-maaliyadeedka sannadlaha ah ugu dambeyn 31da Maarso ee sannadka xiga, Warbixin-maaliyadeedka waxaa mareysaa baaris hanti-dhawre madaxbannaan, taas oo micneheedu yahay:
   a) Xisaabiye u idman qabashada shaqada xisaabaadka oo aan xubin ka hayn Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda;
   b) Shirkad xisaabaadka ka shaqaysa oo aan xubin ku lahayn Golaha Maamulka Sare;

2. Xisaabiyaha/Hanti-dhawraha ama shirkadda xisaabaadka ee baarista ku sameynaysa Hay'adda waxaa lagu magacaabayaa shirka sannadlaha ah ee Golaha Guud.

3. Xisaabiyaha/Hanti-dhawraha ama shirkadda xisaabaadka oo lagu magacaabay Farqadda 1$^{aad}$ (b) ee Qodobkan waxaa khidmadda la siin doono ansixinaya Golaha Guud ee Hay'adda.

4. Golaha Maamulku waxaa ay sannad kasta la wadaagayaan xubin kasta oo Hay'adda ka tirsan warbixin-maaliyadeedka sannadkii tagay oo ay la socoto warbixintii hanti madaxbannaan uu sameeyay, ugu danbayn 31$^{ka}$ May ee sannadka xiga.

**Qodobka 52$^{aad}$**
**Dhaqan-Galka Sharcigan**

Sharcigaan waxuu dhaqan-galayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, uuna saxiixo Madaxwaynaha Jumhuuriyada Federaalka Soomaaliya isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.